Australian Human Rights Commission

Dacwad Samaynta

Guddiga Xuquuqda Aadamiga Australia waa hay'ad madaxbanaan taas oo baarta xalisana dacwadaha ku saabsan galmoodka sharci darada ah, takoorida, iinta iyo takoorida da'da ku salaysan, ILO III takoorida iyo jebinta xuquuqda aadamiga.

Waxyaallaha aad nooga caban karto

- ***Takoorida jinsiga*** waxaa ka mid ah dhibaataynta iyo takoorida ku salaysan galmood, qofku wuxuu yahay, xaallada qof loo tago isna qof u taga galmoodka, uurka, xaallada cilaaqaadka ama guurka, naasnuujinta, masuuliyada qoyska iyo qof wuxuu galmood ka aaminsan yahay.
- ***Takoorida ku salaysan iinta*** waxaa ka mid ah takoorida ku salaysan jirka, garaadka, dareenka, barashada iyo iinta maskaxda, cudurada ama jirada, xaallada caafimaadka, dhaawaca la xiriira shaqada, iin hore, mid hadda ah ama mustaqbilka; iyo la macaamilka qof leh iin.
- ***Takoorida la xiriirta qawmiyada*** waxaa ka mid ah isir nacaybka iyo takoorida qawmiyada ku salaysan midabka, asalka, asalka qawmiyada ama qaranka iyo xaallada soogalootiga.
- ***Takoorida la xiriirta da'da*** waxaa ka mid ah takoorida ku salaysan inaad tahay qof aad u yar ama aad u weyn.
- ***ILO III takoorida*** waxaa ka mid ah takoorida ku salaysan diinta, diiwaanka dembiga, xarakaadka ururka shaqaalaha, aragtida siyaasadeed iyo asalka bulshada.
- ***Xuquuqda aadamiga*** waxaa ka mid ah ficilka lagu sameeyey magaca Dawlada dhexe taas loo arko in lagu jebiyey xuquuqda caalamiga ah ee aadamiga oo mucayina, sida Heshiisyada Caalamiga ah ee Madaniga ah iyo Xuquuqda Siyaasada, Heshiisyada Xuquuqda Ilmaha iyo Heshiiska Xuquuqda Dadka leh Iinta.

Waxaad samayn kartaa dacwad iyada oo aan ku xirnayn meesha aad ku nooshahay waxna kugu kalifimayso inaad samayso dacwad. Talaabooyinka dacwada hoos ayaa lagu sharxay.

Wax weydiinta

- Haddii aadan hubin inaad dacwad samayn karto ku saabsan arrin, waxaad la xiriiri kartaa Guddiga Adeegiisa Macluumaadka Dacwdooyinka adiga oo wacaya **1300 656 419** ama email u diraya complaintsinfo@humanrights.com.au
- Waxaan kuu soo diri karnaa foomka dacwada si aad u bilawdo habka la qaadayo.
- Haddii aan lagu caawimi karin, waxaanu isku deyeynaa in aan kuu xawilo qof ku caawin kara.

Dacwad samaynta

- Dacwadu waa inay ahaataa mid qoran. Waxaad buuxin kartaa foomka dacwada ka dibna boostada ku soo dir ama fakis noogu soo dir ama waxaad ka xerayn kartaa dacwad online websaytkayaga. (www.humanrights.gov.au)
- Waxaad samayn kartaa dacwad ku qoran afkaad doorbidayso waxaana kaa caawin karaa inaad qorto dacwadaada haddii taasi lagama maarmaan tahay.
- Haddii aadan u baahnayn garyqaan si aad dacwad u samayso.
- Haddii aadan la macaamili karin, waan kuu sharxaynaa sababta.

Baaritaan

- Waanu kula soo xiriiri doonaa wixii ku saabsan dacwadaada waxaana laga yaabaa in aan ku weydiino inaad macluumaad bixiso.
- Guud ahaan, Guddigu wuxuu la xiriiri doonaa qofka ama ururka aad ka dacwoonayso, waxaana la siin doonaa koobiga dacwadaada waxaana la weydiisanaya inay jawaab iyo macluumaadka kale ee loo baahan yahay bixiyaan. Waan kula socodsiinaynaa waxay yiraahdaan iyaga oo ka jawaabaya dacwadaada.
- Xaalladaha qaarkood waxaa laga yaabaa inaan go'aan ka gaaro dacwadaada. Haddii taasi dhacdo, waan kuu sharxaynaa sababta.
- Waxaa laga yaabaa in aan ka hadalo wixii ku saabsan xalinta dacwada si loo heshiiyo.

Heshiin

- Heshiinta macneheedu waxa weeye waxaan isku deyeynaa in aan ku caawino adiga iyo qofka ama ururka aad ka dacwoonayso wixii ku saabsan helida habkii lagu xalin lahaa arrinta.
- Heshiintu waxay u dhici kartaa si la is horfariisanayo waxaana loogu yeeraa ' shirka heshiiska' ama shir ku qabashada telefoonka. Xaalladaha qaarkood waa la xalin karaa iyada oo la is-dhaafsanayo warqado ama fariimo telefoon lagu wada xiriirayo ama email iyada oo la adeegsanayo qof u kala dabqaadaya.
- Dacwada waxaa loo xalin karaa siyaalla kala duwan. Tusaale ahaan cudurdaarasho, iyada oo la bedelo nadaamka ama magdhow.

Suurtagalka Fal maxkamadeed – galmo, iin, jinsi iyo takoorida da'da

- Guddigu ma laha awooda go'aan looga gaaro haddii takoorid sharci dara ahi dhacday.
- Haddii dacwadaada aan la xalin ama la joojiyo sababa kale aawadood, arrinta waxaad geyn kartaa maxkamad. Maxkamadu go'aan ayay ka gaari kartaa haddii ay dhacday takoorid.
- Waxaad haysataa 60 berri marka Guddigu dhameeyaan dacwada inaad samayso dalab ay u gudbinayso Federal Circuit Court of Australia ama Federal Court of Australia.
- Guddigu kuuma geyn karo arrinta maxkamada ama kaama caawimi karo inaad u qadinto maxkamada.
- Waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay inaad la hadasho garyaqaankaaga haddii aad rabto inaad aado maxkamada.

Warbixinta/Go'aanka –ILO III takoorid iyo xuquuqda aadamiga

- Haddii dacwada aan la xalin ama la joojiyo sababa kale awgood, Madaxweynaha Guddiga ayaa go'aan ka gaari doona haddii la jebiyey xuquuqda aadamiga ama la jebiyey takoorida ILO III. Tani waxay noqonaysaa madaxweynaha oo qabta dhegaysi dadweyne halka dhinac walba soo qadimo mawqifkiisa ama munaasabadaha iyo jawaabaha su'aallaha.
- Haddii madaxweynuhu ku qanacsan yahay inuu dhacay takoor ama la jebiyey xuquuqda aadamiga, madaxweynuhu wuxuu u gudbin doonaa warbixinta Xeer-ilaaliyaha guud. Warbixinta, madaxweynuhu wuxuu ku talin karaa magdhow wax kasta oo dhaawac ama khasaaro ku dhacday qofka. Warbixinta waa in la keenaa miiska.
- Tusaalayaasha go'aanada madaxweynaha ee ku saabsan takoorida iyo xuquuqda aadamiga waxaa laga hellaa Guddiga websaytkooda oo ah: http://www.humanrights.gov.au/publications/reports-minister-under-ahrc-act.

Xaggee ka helli karaa macluumaad intaas ka badan?

Guddiga Xuquuqda Aadamiga ee Australia faahfaahintoodu waa:

Tel:

Khadka macluumaadka dacwada:	1300 656 419 (wicida maxaliga ah)
TTY:	1800 620 241
NRS:	133 677
Fakis:	(02) 9284 9611

Haddii aad u baahan tahay mutarjum waxaad wici kartaa **131 450** weydiina in lagugu xiro Guddiga Xuquuqda Aadamiga.

Haddii wax maqalku kugu adag yahay waxaad nagala xiriiri kartaa TTY telefoonka 1800 620 241. Haddii aad dhega la'dahay ama hadalku kugu adag yahay waxaad iyana nagala xiriiri kartaa Adeega Gudbinta Qaranka (NRS) tel: 133 677. Haddii aad u baahan tahay Auslan, Guddigu wuu qaban qaabin karaa arrintan.

Haddii aad indha la'dahay, Guddigu wuxuu ku bixin karaa macluumaad hab midkan ka duwan marka la codsado.

Boostada

Australian Human Rights Commission
GPO Box 5218
Sydney NSW 2001

Online-ka

Email: complaintsinfo@humanrights.gov.au
Websaytka: www.humanrights.gov.au

Waxaad ka samayn kartaa dacwad online-ka
http://www.humanrights.gov.au/complaints/lodging-your-complaint.

Tala sharciyeed oo guud

Haddii aad ka fekerayso inaad samayso dacwad, waxaa iyana laga yaabaa inaad ka fekerto helista talo sharciyeed ama la xiriirto ururka bulshada. Waxaa jira adeeg bulsho oo sharciga kaas oo bixin kara talo lacag la'aana oo ku saabsan takoorida iyo dhibaataynta. Faahfaahinta lagala xiriirayo xarunta kuugu dhow ee sharciga waxaa laga helli karaa www.naclc.org.au/directory.

Afeef: macluumaadka xaashidaan xaqiiqada waxaa looga jeedaa keliya tuse ahaan. Ma bedelayso talada sharciga.